# Centerpartiet



## Shaqooyinka, cimilada iyo barwaaqa-sooranka guud ahaan dalka.

**Iswiidhan waxay qaban kartaa wax badan.**

## Shaqooyinku wey badan doonaan

Marka in ka badan nus milyan ay yihiin shaqo la'aan waxay saamayn ku yeelaneysaa xitaa adiga oo shaqeeya. Markaa inta ay dadka shaqo haysta badan yihiin, dhaqaala-ha Iswiidhan wuu sii adkaanayaa. Waayo markaa waxaan sidoo kale awood u yeelan karnaa inaan maalgelino nadaamka barwaaqasooranka. Intaa waxaa dheer: qofka shaqo helaa wuxuu yeelanayaa mecnaha nolosha, xornimo weyn iyo fursado badan oo uu mustaqbalkiisa ku qaabeeyo.

→ **Ka dhig shaqaaleysiinta mid jaban.** Canshuurta shaqaaleynta waa in laga masaxaa dhallinyarada,dadka muddada dheer shaqo la'aanta ah iyo kuwa ugu horeeyo ee laga shaqaaleeyo shirkadaha soo koraya.

→ **Waa in mar walba lagu faa'idaa in shaqo la helo.** Hoos u dhig canshuurta dadka dakhligoodu yar yahay oo hubi in had iyo jeer ay faa'iido leedahay in laga guuro qaadashada kaalmada dhaqaale oo loo guuro shaqo.

→ **Ka dhig mid sahlan in shirkad la furto.** Ka tuur sharciyada dhibka badan.

## Waa in la yareeyaa sii deynta gaaska waxyeelada leh

Markaynu maalgelino cimilada waxaan sidoo kale maalgelinay shaqada iyo nolosha barwaaqasooranka berrito. Waxaa kuu roon adiga, una roon bulshadda ganacsiga iyo cimiladaba danab koronto cagaar oo raqiis ah.

→ **Danab koronto badan oo qiime jaban.** Si xoog badan u ballaari soo saarista danabka korontada oo kala bar. Waqtiga fulinta hawsha ee dhismaha shabakadda korontada iyo unugyada isku unugyada isku xirka.

→ **Yaree canshuurta iyo lacagaha khidmada ee korontada,** si qoysaska iyo shirkadahuba u helaan xaalado ay kaga wareegaan shidaalka foosiilka.

→ **Ha koraan warshadaha cagaaran.** Ayadoo la raacayo qawaaniinta hadafka meel fog gaaraya, hammi cimilo cad iyo taageero la xoojiyey. Kala bar waqtiga hogaanka fulinta hawlaha ee shirkadaha cimilada ayadoo la dedejinayo waraaqaha ruqsadaha.

→ **Ka dhig mid faa'iido leh in la habguuro.** Qayb weyn oo lacagaha waxay ku haraan halka danabka korontada laga soo saaro. Hoos u dhig canshuurta danabka dib loo cusbooneysiin karo, ku soo rog gunnada lacag dhimista baabuurta korontada dib loo cusbooneysiiyo ee dalkoo dhan islamarkaana kharajka dhimista cagaaran ee guriyaha.




## Daryeelka caafimaadka, iskuulada iyo daryeelka waayeelada oo u shaqeynaya dad badan

Marka aynu nahay kuwa ugu liita, marka aan xanuunsanahay, marka aan caruur nahay, marka aan waayeelo nahay oo aan dhib yar ku qabno inaan dabbirano wixii aan hore u qaban jirnay, markaa mujtamaca ayaa noo jooga oo na caawinaya.

→ **Daryeelka caafimaadka, iskuulada iyo daryeelka waayeelada waa inay ka shaqeeyaan dalka oo dhan.** Ayadoo aan loo eegin meesha aad deggan tahay, waxaad xaq u leedahay inaad hesho daryeel caafimaad wanaagsan markaad u baahan tahay, in caruurtaada ay dhigtaan iskuul arkaya waxna baraya iyo in ayeeyo ay hesho caawimaad iyo ammaan.

→ **Maalgelin weyn ee caafimaadka maskaxda ee dhallinyarada.** Goor hore sii taakulaynta, xooji caafimaadka ardayda una dhis xarunta caafimaadka maskaxda ee caruurta iyo dadka waaweyn labadaba si dad badan ay u helaan caawimaad markay u baahan yihiin.

→ **Xaalado wanaagsan iyo mushaar sare oo ka jira nadaamka barwaaqasooranka.** Dadka ka shaqeeya daryeelka caafimaadka waa in la siiyaa mushaar fiican. Dadka waaweyn ee ka shaqeeya hadday rabaan wey sii shaqeyn karaan.

## Iswiidhan waxay mudan tahay wax ka badan.

**Waxaad mudan tahay dawlad si dhab u abbaareysaa qaddiyadaha waaweyn.** Mid hubineysa in dadweynuhu haystaan shaqo ay tagaan subaxii oo dib u dhaqaajisa dhaqaalaha dalka. Dawlad hubineysa in qiiqa war- shadaha yaraado iyo in ganacsiga dalka Iswiidhan uu noqdo kan horseedka u ah dunida ka toosinta cimilada. Mid soo jaraya safka dheer ee daryeelka caafimaadka, hubinaya in caruurta ay helaan iskuulo wanaagsan, in ayeeyo ay hesho caawimaad ayadoon loo eegin halka ay ka deggan tahay dalka iyo in shaqaalaha daryeelka caafimaadka aysan daal u dhiman.

**Waxaad mudan tahay dawlad leh maskax iyo qalbi.** Taasoo u ololeysa siyaasad sharci adag, laakiinse aan ku fekereynin in caruurta xabsi la dhigo. Taasoo rabta nadaam iyo kala dambeyn yeelata siyaasadda socdaalka – tusaale ahaan in. Musaafurinta dadka si sax u dhaqma, wax barta oo shaqeysta haddana wax ku soo kordhiya bulshadda waana mid aaan macquul ahayn dhaqaale ahaana u wanaagsaneen. Mid ku fekerta in mar walba ay faa'iido leedahay in la shaqeysto, ayna sababtaa u dooneyso inay ka yareyso canshuurta dadka mushaar hoose qaata.

**Waxaad mudan tahay dawlad aan u janjeedhin midig iyo bidix midnaba.** Waxaan ku qanacsanahay in ay dadku ku ladan yihiin inay nololmaalmeedkooda wax badan ka go'aansadaan. Qofku waa in lagu qiimeeyaa waxa uu qabto ee ma ahan midabka jidhkiisa ama darajada hawsha uu hayo. Iswiidhan waxaa si xooggan loogu dhisay kalsooni, furfurnaan iyo mas'uuliyad. Sidaa awgeed baan u dooneynaa inaan siyaasad xad dhaaf ah ka fogeyno awoodda dawladda.

## Iswiidhan wax badan ayey qaban kartaa.
## U codee xisbiga Centerpartiet.

Centerpartiet